

**Jamhuuriyada Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Duqa Caasimadda**



**Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa
Mayor's Office**

Go'aan Lr: 136/2025.

Date: 14th May 2025.

Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa **14th May 2025**, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargaysa Mudane **(C/kariim Axmed Mooge)**, Kuna saabsanayd Tirtiris/Cancelled Tr-ka Numberkiisu yahay **24024**, Dood & falan-qayn dheer ka dib: -

Guddida Fulintu: -

Markay Arkeen

Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer No: 23/2019.

Markay Arkeen

Qoddobka **2aad**, farqadiisa **1-aad** ee Xeerka Maamulka Dhulka iyo Magaalooyinka Xeer Lr: **17/2001**, oo tilmaamaya Awooda Maamulka iyo dhul bixinta ee Dawlada Hoose Hargeysa.

Tixraaca warqada Nootaayada ee sumadeedu tahay **REF: XNH/0348/2020**, kuna taariikhaysan **22/10/2020**, ujeedadeeduna tahay kala iibsi dhul cabirkiisu dhan yahay **48*90M**, kuna yaala Degmada Maxamuud Haybe, isla markaana ay iibsatay Istaahil Cumar Nuur, kana soo baxday Xafiiska Nootaayada Sharciga ah ee Hanad Public Notary.

Tixraaca warqada Nootaayada ee sumadeedu tahay **REF: XNH/0982/2023**, kuna taariikhaysan **12/12/2023**, ujeedadeeduna tahay Cadaynta heshiiska kala iibsi ee Nootaayada kor ku xusan, kana soo baxday Xafiiska Nootaayada Sharciga ah ee Hanad Public Notary.

Tixraaca warqada sumadeedu tahay **DHH/DMH/253/2025**, kuna taariikhaysan **5th May 2025**, ujeedadeeduna tahay warbixin Tr la Tirtirayo, kana soo baxday Gudoomiyaha Degmada M/Haybe.

Markay Xaqiiqsadeen

In ay haboon tahay in la tirtiro Tr-ka dhulkan ka baxay, maadama la soo cadeeyey in ay iska leedahay Muwaadinad Istaahil Cumar Nuur, isla markaana la rabo in loo Tirtiro Tr-ka ka baxay goobtan.

Markay Tixgeliyeen

Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadey: -

Ka dib markii ay arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Guddiga fulintu wuxuu Go'aansadey in la tirtiro Tr-ka numberkiisu yahay **24024**, kuna qoran tahay **Faadumo Nuur Xandulle**, iyadoo loo madaxbanaanaynayo Tr-ka Numberkiisu yahay **26172**, kuna qoran tahay **Istaahil Cumar Nuur**, isla markaana la soo cadeeyey in ay dhulkan leedahay **Istaahil Cumar Nuur**, sidaasi daraadeed, waxaanu faraynaa dhamaan Xafiisyada ay khusayso in ay go'aankan dhaqan galiyaan.

(Siciid Nuur Jaamac).

Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa



Mahad

leh.

(Khadar Axmed Cumar Khadar Nuur)
Ku xigeenka Duqa Caasimada Hargeysa

(C/kariim Axmed Mooge),
Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Guddi
Golaha Deggaanka Caasimada Hargeysa

